PRO FAMILIA WAXAY BIXISAA MACLUUMAAD KU SAABSAN GUDNIINKA GABDHAHA

CAWAAQIB NOOCEE AH AYUU GUDNIINKU HABLAHA IYO DUMARKA KU YEESHAA?

- Dhalmo la'aan
- Caabuq xanuun oo aan hadhin (sida kaadi-haysta oo xanuunta)
- Xanuun marka ay kaad-jayaan
- Kaadida oo ay xejisan kari waayaan
- Xanuun badan oo ay dareemaan xilliga galmada
- Dhibaato kala soo gudboonaata galmada iyo khilaaf qoys
- Xanuun daran iyo caqabasho
- Dhibaato la soo gudboonaata xilliga dhalmada
- Dhibaatooyin nafsi ah sida murugo, isku buuq, hurdo iyo cunto xumo
- Dhiig-bax dhimasho gaadha, xanuun iyo murugo

MA DOONAYSAA INAAD INANTAADA ILAALISO?

Miyay kugu adag tahay inaad ka tagto caadadan xun ee soo jireen ah?

Qoyskaaga ama degaanka aad ku nooshahay miyuu culays kugu saaraa?

Gudniinka fircooniga ah miyuu adiga ku saameeyey ama dhibaato caafimaad oo la xidhiidha gudniinka fircooniga ah ma kula soo deristay?

Adiga ama inantaada qof kale ma kugu hanjabay gudniinka fircooniga ah?

Ha ka gabban inaad nala soo xidhiidho!

SOMAALI

pro familia Bayern

Gudniinka gabdhaha

MACLUUMAAD

www.profamilia.de

WAA MAXAY GUDNIINKA FIRCOONIGA AH? GUDNIIN?

Gudniinka fircooniga ah waxa weeyi iyada oo qayb ahaan ama gabigiisa ba la goynayo xubinta taranka ee gabadha.

Waxa jira dhawr nooc oo gudniinka fircooniga ah.

Waxa jira ku dhawaad 200 milyan oo hablo ah oo la gudo guud ahaan caalamka (UNICEF 2016).

MAXAA HABLAHA LOO GUDAA?

Gudniinka fircooniga ah waa caado guun ah dhaqanada kala duwan iyo dalalka caalamka.

Marka loo eego caadadan, gudniinka fircooniga ah waa muhiim sababtoo ah:

- Nadiifinta iyo ilaalinta bikrada gabadha,
- Ku iimaanqabka ninka guursanaya gabadha

WAA MUHIIM INAAD OGAATO:

Ma jirto diin ka mid ah diimaha dunida oo bannaysay gudniinka!

Midowga Yurub wuxuu siiyaa gabadha magangalyo gabadha loo maxkamadeeyo jinsigeeda oo uu ku jiro gudniinka fircooniga ah.

Dalka Jarmalka, gudniinka hablaha waxa lagu qeexaa dhaawac shakhsiyadeed, sharci ahaan na waa mamnuuc. Waalidiinta sidoo kale, waa lagu ciqaabaa (tusaale ahaan: xabsi gelin) haddii ay qorsheeyaan gudniinka fircooniga ah iyo ama haddii ay hablahooda dalka ka saaraan si ay usoo gudaan.